**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**WASAARADDA GAASHAANDHIGGA**

# SIYAASADDA QARAN EE ILAALINTA BED-QABKA RAYIDKA XILLIYADA HAWL-GALLADA CIIDAN IYO COLAADAHA

***Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Gaashaandhigga, Xukuumadda JFS 2026***

## TUSMO:


HAL-KU-DHEGGA WASIIRKA GAASHAANDHIGGA ..... 2
QEYBTA 1 – HORDHAC ..... 6
1.1 Xaaladda Guud iyo Ujeeddada ..... 6
1.2 Yoolalka Istiraatijiga ah ee Siyaasaddan ..... 7
1.3 Ahmiyadda Siyaasadda ..... 8
1.4 Waajibaadka Sharci ee Siyaasadda ..... 8
1.5 Baaxadda iyo Hay'adaha leh Fulinta Siyaasadda ..... 10
1.6 Hannaanka Loo Maray Sameynta Siyaasadda ..... 11
QEYBTA 2 – QAAB-DHISMEEDKA SIYAASADDA ..... 12
2.1 Guud-marka Qaab-dhismeedka ..... 12
2.2 Tiirka 1aad: Xoojinta Iskuduwidda Rayidka iyo Ciidanka (CIMIC) ..... 12
2.3 Tiirka Labaad: Wargelinta Rayidka ee Khataraha Ka Hor Inta Aysan Bilaaban Hawl-gallada Amni ..... 15
2.4 Tiirka Saddexaad: Ilaalinta Bed-qabka Dadka Nugul ..... 16
2.5 Tiirka Afaraad: Kormeerka, Isla-xisaabtanka iyo Dhaqan-gelinta Siyaasadda ..... 22
2.6 Tiirka Shanaad: Hay'adaynta iyo Joogtaynta Dhaqan-gelinta Siyaasadda ..... 26

# HAL-KU-DHEGGA WASIIRKA GAASHAANDHIGGA

Soomaaliya waxay taagan tahay marxalad muhiim ah oo ku saabsan dhismaha dawladnimada iyo xaaladda kala-guurka amniga. Ciidamada amniga qaranka ayaa si buuxda ula wareegay mas'uuliyadda amniga dalka iyo xasillinta deegaanada laga xoreeyey argagixisada. Wasaaradda Gaashaandhigga oo matalaysa Dawladda JFS waxay xoojinaysaa in ilaalinta bed-qabka rayidku ay tahay waajib dastuuri ah oo qaran iyo mas'uuliyad anshaxeed.

Siyaasadda Qaran ee Ilaalinta Bed-qabka Rayidka waxay ka turjumaysaa ballan-qaad midaysan oo ay fulinayaan hay'adaha amniga ee qaranka taasoo ah in dhammaan hawl-gallada amniga loo fuliyo heerka ugu sarreeya eeTaxadarka iyo Xirfad sarreysa oo ku astaysan sharciyad si loo badbaadiyo loona xaq-dhawro nolosha shacabka. Siyaasaddani waxay dejinaysaa hannaan qaran oo isku xiran kaasoo ka hortegaya waxyeelleynta rayidka, xoojinayana iskuduwidda hay'adaha iyo iskaashiga ay bulshadu la leedahay ciidanka amniga si waafaqsan shuruucda dalka iyo xeerarka caalamiga ah.

Siyaasaddani waxay qeyb muhiim ah ka tahay hannaanka dib-u-qaabaynta hawlaha ciidan ee difaaca iyo amniga dalka si loo dhiso ciidan qaran oo leh karti iyo anshax ay shacabkooda ugu adeegaan kuna ilaaliyaan bed-qabkooda. Siyaasadda Ilaalinta bed-qabka rayidka waxaa si buuxda loogu saleynayaa hannaanka dejinta nidaamka tababarrada, mabaadi'da Ciidanka iyo qorsheynta hawl-gallada si loo hubiyo in hawl-gal kasta u hoggaansamay fulinta waajibaadka ilaalinta bed-qabka rayidka.

Wasaaradda Gaashaandhigga oo gudanaysaa Waajibaadkeeda ilaalinta bed-qabka rayidka ayaa xoojisay dedaallada lagu dhisayo awoodda Ciidanka Xoogga Dalka (CXD), gaar ahaan dhisidda xirfadda Ciidanka ee ilaalinta bed-qabka rayidka, waxayna ciidamada u sameysay tababarro iyo horumarin xirfadeed oo la xiriira dhex-galka iyo la-macaamilka rayidka. Wasaaraddu waxay dadaal gelisay in qorsheynta hawl-gallada lagu saleeyo ilaalinta bed-qabka rayidka si waafaqsan Siyaasadda Hubinta Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha (HRDDP). Sidoo kale, Wasaaraddu waxay xoogga saartay ilaalinta bed-qabka carruurta Soomaaliyeed xilliyada hawl-gallada ama ay jiraan colaadaha hubysan. Wasaaradda waxay, sidoo kale, dadaal badan gelisay ka shaqeynta sidii ciidamada amniga soomaaliyeed looga saari lahaa liiska madow ee askaraynta carruurta, iyadoo dadaalkaas loo maray sameynta tababarro iyo baaritaanno xeel-dheer oo la xiriira mamnuucidda askaraynta carruurta, taasoo ugu dambayn Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ka soo saaray qaraar rasmi ah oo tirsigiisu yahay **A/79/878–S/2025/247** oo ku taariikheysan **17 Juun 2025**, kaasoo Goluhu uga saaray ciidanka amniga JFS liiska madow ee askaraynta carruurta.

Wasaaradda Gaashaandhigga waxay u mahad-celinaysaa dhammaan hay'adahii ka qeyb-qaatay dejinta siyaasaddan, sida hay'adaha amniga ee Dawladda JFS, Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka Federaalka (FMS), bulshada rayidka iyo saaxiibada caalamka. Waxayna ugu baaqaysaa dhammaan Wasaaradaha, Taliska Guud ee Ciidanka Xoogga Dalka (CXD), Talisyada Qeybaha, Cutubyada Hawl-gallada, Taliska Booliska Soomaaliyeed, Taliska

Hay'adda Nabad-sugidda iyo Sir-doonka Soomaaliyeed (NISA), Daraawiishta iyo dhammaan xubnaha ciidamada amniga qaranka ay si buuxda u fuliyaan siyaasaddan, isla markaana ay hubiyaan in tallaabo walba oo loo qaadayo difaaca iyo sugidda amniga qaranka noqoto mid markasta ilaalinaysa karaamada, sharafta iyo sumcadda, isla markaana badbaadinaysa oo dhawraysa Xuquuqda muwaadinka Soomaaliyeed.

Wasaaradda Gaashaandhigga waxay, sidoo kale, u mahad-celinaysaa kaalinta farsamo oo uu ku biiriyey Xafiiska Ergayga Gaarka ah ee Madaxweynaha JFS ee Xasillinta iyo Ilaalinta Bed-qabka Rayidka. Waxay, sidoo kale, u mahad-celinaysaa kaalinta ay hay'adaha amniga iyo kuwa rayidka ee ku shaqada leh fulinta siyaasadan ay ka qaateen dhammeystirka siyaasaddan xilliyadii aan ku guda-jirnay diyaarinta iyo dhammeystirka siyaasaddan. Waxaan, sidoo kale, u mahad-celinaynaa talo-bixinnadii bulshada rayidku iyo dhammaan daneeyeyaasha siyaasaddan ay ku biiriyeen kaabidda iyo tayeynta siyaasaddan.

Anagoo wadajirna, waxaan ilaalinaynaa bed-qabka shacabkeena, waxaana xoojinaynaa amniga qaranka si aan u xaqiijino Soomaaliya oo ku naaloota amni iyo nabad buuxda.

Mudane Danjire Axmed Macallin Fiqi
**WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA**
**XUKUUMADDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

## ERAYADA LA SOO GAABIYEY/KOOBAY (ABBREVIATIONS/ACRONYMS)

| **AMISOM** | **Hawl-galka Midowga Afrika ee Soomaaliya** |
|---|---|
| **ATMIS** | Hawl-galka Kala-guurka Midowga Afrika ee Soomaaliya |
| **AU** | Midowga Afrika |
| **AUSSOM** | Hawl-galka Taageerada iyo Xasillinta Midowga Afrika ee Soomaaliya |
| **CAAC** | Carruurta Ay Saameeyeen Colaadaha Hubeysan |
| **CPIA** | Qiimeynta Saameynta Ilaalinta Bed-qabka Rayidka |
| **CHMTRU** | Unugga Daba-galka, Yareynta iyo Ka-jawaabista Waxyeellada Rayidka |
| **CIMIC** | Iskuduwidda Rayidka iyo Ciidanka |
| **CPIP** | Qorshaha Hirgelinta Ilaalinta Bed-qabka Rayidka |
| **CRFP** | Madasha Ka-hortagga Khatarta Rayidka iyo U-Jawaab-celinta Bulshada |
| **CRPD** | Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah |
| **CRSV** | Xad-gudubyada Galmo ee Xilliyada Colaadaha |
| **DDR** | Hub-ka-dhigis, Kala-dirid iyo Dib-u-dhexgelin Bulsho |
| **DPSCs** | Guddiyada Degmooyinka ee Nabadda iyo Xasilloonida |
| **EWAG** | Kooxda Falanqaynta Digniinada Hordhaca ah |
| **EWRN** | Shabakadda Digniinaha Hordhaca ah iyo Ka-jawaabista |
| **FGS** | Dawladda Federaalka Soomaaliya |
| **FMS** | Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka |
| **FOBs** | Bar-difaaceedyada |
| **GBV** | Tacaddiyada Ku Saleysan Jinsiga |
| **IDP** | Barakaceyaasha Gudaha |
| **IHL** | Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadanimada |
| **IHRL** | Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha |
| **INGO** | Hay'ad Samafal ee Caalamiga ah |
| **JSA** | Qiimeynta Istaraatijiyadeed ee Wadajirka ah |
| **JTA** | Qiimeynta Farsamo ee Wadajirka ah |
| **MEL** | Kormeer, Qiimeyn iyo Cashar ka Barasho |
| **MoD** | Wasaaradda Gaashaandhigga |
| **MoFAHRD** | Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha |
| **MoF** | Wasaaradda Maaliyadda |
| **MoICT** | Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska |
| **MoIFAR** | Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta |
| **MoIS** | Wasaaradda Amniga Gudaha |
| **MoJCA** | Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka |
| **NCPCS** | Istaraatijiyadda Qaran ee Isgaarsiinta Ilaalinta Bed-qabka Rayidka |
| **NCRI** | Guddiga Qaranka ee Qaxootiga iyo Barakaceyaasha |
| **NCMCM** | Hannaanka Qaranka ee Iskuduwidda Rayidka iyo Militariga |
| **NPOCP** | Siyaasadda Qaranka ee Ilaalinta Bed-qabka Rayidka |
| **OP** | Xafiiska Madaxweynaha |

| | |
|---|---|
| **ONS** | Xafiiska Amniga Qaranka |
| **OPM** | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha |
| **OSE-SCP** | Xafiiska Ergeyga Gaarka ah ee Xasillinta iyo Ilaalinta Bed-qabka Rayidka |
| **PFM** | Maareynta Maaliyadda Dadweynaha |
| **POC** | Ilaalinta Bed-qabka Rayidka |
| **ROE** | Xeerarka Hawl-gallada |
| **SNAF** | Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed |
| **SoDMA** | Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya |
| **SOP** | Hab-raaca iyo Hal-beegyada Hawl-galka |
| **SPF** | Ciidanka Booliska Soomaaliyeed |
| **SSDP** | Qorshaha Horumarinta Amniga Soomaaliya |
| **UN** | Qaramada Midoobay |
| **UNHCR** | Hay'adda Qaramada Midoobay u Qaabilsan Qaxootiga |
| **UNSC** | Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay |
| **NIHRC** | Guddiga Qaran ee Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha |

# QEYBTA 1 – HORDHAC

## 1.1 Xaaladda Guud iyo Ujeeddada

Soomaaliya waxay maraysaa mid ka mid ah kala-guurkii amni ee ugu weynaa tan iyo markii ay bilaabmeen hawl-gallada caalamiga ah ee taageerada nabadda sanadkii 2007. In ka badan toban sano, Hawl-galka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM), kaas markii dambe isu beddelay Hawl-galka Kala-guurka Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS), ayaa fulinayey hawlo amni oo jiida hore ah, kuwaasoo lagula dirirayey kooxaha argagixisada si loo xaqiijiyo xasillinta deeganada iyo dhismaha dawladnimada Soomaaliyeed.

Iyadoo la raacayo Qaraarrada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay (UNSC) ee tirsigoodu yahay 2628 (2022), 2687 (2023), iyo 2767 (2024), Hawl-galka ATMIS wuxuu soo gebagaboobay 31[kii] Diseembar 2024, ka dib waxaa xigay dhimista ciidamadooda iyadoo loo fuliyey qaab is-daba-jooga ah, waxaana lagu saleeyey qiimeyn farsamo oo istiraatiji ah oo si wadajir ah loo fuliyey. Hawl-galka AUSSOM oo beddelay ATMIS ayaa bilaabmay 1[da] Janaayo 2025 iyadoo waajibaadkiisu ku kooban yahay talo-bixinno iyo taageero farsamo.

Madalladii horay u jiray ee ilaalinta bed-qabka rayidka, sida Siyaasadda Hubinta Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha (HRDDP) iyo Kooxaha Shaqo ee ilaalinta carruurta ay saameeyeen colaadaha hubeysan (CAAC Working Group) oo ay Wasaaradda Gaashaandhiggu hoggaamiso waxay ka qeyb-qaateen yareynta waxyeellada soo gaarta rayidka xilliyada ay socdaan hawl-gallada ciidan ama ay jiraan colaadaha hubaysan. Waxaa xusid mudan, in Kala guurkii hawl-gallada AMISOM iyo ATMIS oo u xuub-siibtay hawl-galka AUSSOM ay dedejisay in ciidamada amnigu la wareegaan mas'uuliyadda hoggaaminta hawl-gallada amni iyo bar-difaaceedyada (FoBs).

Iyadoo laga duulayo mabda'aas, dawladda soomaaliya waxay ciidamada amniga soomaaliyeed ku sameysay dib-u-dhis, qaabayn iyo xoojinta awoodda hoggaamin ee hawl-gallada taasoo keentay in ay awood u yeeshaan hoggaaminta hawl-gallada lagu xoraynayo deegaanada ay haystaan kooxaha argagixisada iyo cid kasta oo hubaysan. Tan iyo markii ay qabatay xukunka dawladda uu hoggaaminayo Madaxwayne Dr. Xasan Sheekh Maxamuud (May 15, 2022) dhammaan hawl-galladii ciidan ee la fuliyey iyo deegaanada laga xoreeyey kooxaha argagixisadda waxaa hoggaaminayey ciidanka amniga soomaliyeed oo taageero ka helayey saaxiibada caalamka. Haddaba, awoodda hoggaamineed ee ciidamada amniga Soomaaliyeed waxay muujinaysaa baahida loo qabo xoojinta, nidaaminta iyo si loo dhaqan-geliyo nidaam buuxa oo leh qaab-dhismeed ciidan qaran oo awood u leh ilaalinta bed-qabka rayidka si waafaqsan dastuurka qaranka, xeerarka dhaqan-galka ah iyo kuwa caalamiga ah, si loo yareeyo waxyeellada soo gaari karta rayidka. Waxaa lama-huraan ah in la helo nidaam ilaalin rayid oo leh fulin, iskuduwid wadajira, kormeerid iyo isla-xisaabtan kaasoo si buuxda loogu dhaqan-geliyo qorsheynta, fulinta iyo qiimeynta hawl-gallada amniga. Dadaaladan waxay

fududaynayaan yareynta khataraha ay wajihi karaan rayidku, sida dhibaatayn, barakac, aargoosi iyo in ay waayaan naftooda iyo hantidooda.

Ilaalinta bed-qabka rayidku waa shardi aasaas u ah hirgelinta hawlaha xasillinta si loo dhiso kalsoonida bulshada, loona suurta-geliyo soo-celinta hay'adihii maamul iyo kuwii adeegyada bulshada ee Goobaha rayidku ay waxyeelladu ka soo gaarto ama ay ka qabaan cabsi ciidamada amniga, hawlaha xasillintu kama hana-qaadaan, guulaha amniga laga gaarana si degdeg ah ayey ku burburi karaan. Sidaa darteed, ilaalinta rayidku waa tiirka saldhigga u ah in ay hawlaha xasillintu ay waaraan.

## 1.2 Yoolalka Istiraatijiga ah ee Siyaasaddan

Yoolalka Istiraatijiga ah ee Siyaasaddan waa kuwan hoos ku xusan:

i. In la dhiso qaab-dhismeed siyaasad qaran oo ku wajahan dhanka Ciidanka taasoo awood u leh ilaalinta bed-qabka rayidka xilliyada hawl-gallada ama ay jiraan colaadaha hubaysan kaasoo waafaqsan xeerarka dalka, shuruucda caalamiga ah ee Bani'aadanimo (IHL) iyo yoolalka hawlaha xasillinta.

ii. In la samayeeyo hab-raacyo iyo hannaan iskuduwid wadajir ah oo ka kooban rayid iyo ciidan oo ay hoggaaminayso wasaaradda gaashaandhigga oo kaashanaysa hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasaddan.

iii. Xoojinta u-hoggaansanaanta waajibaadka sharci ee u-tababarridda ciidamada amniga ilaalinta rayidka, shuruucda caalamiga ah ee bani'aadanimada (IHL) iyo yareynta waxyeellada rayidka.

iv. In wasaaradda gaashaandhigga ay mideyso Nidaamka tababarrada iyadoo la dabaqayo Siyaasadda qaran ee ilaalinta rayidka si waafaqsan xeerarka qaranka (Shareecada, Xeer-dhaqanka iyo shuruucda dawliga ah), kuwa caalamiga ah ee bani'aadanimo (IHL) iyo kuwa xuquuqda aadanaha (IHRL).

v. In la hirgeliyo shabakad qaran oo bixisa digniinaha hore iyo ka-fal-celinta degdegga ah taasoo lagu maareynayo khataraha ay wajihi karaan rayidku (Early Warning and Response Network – EWRN)) oo ay ku jiraan hababka wargelinta dadweynaha, qaab-dhismeedyada digniinta degdegga ah iyo marinnada xiriirka bulshada si loo xaqiijiyo hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo wada-shaqeynta tooska ah ee bulshada iyo hay'adaha amniga.

vi. Siinta mudnaan gaar ah ilaalinta bed-qabka dadka nugul (Caruurta, Haweenka, Waayeelka iyo dadka qaba baahiyaha gaarka ah) si waafaqsan xeerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah.

vii. Xoojinta Unugga Daba-galka, Yareynta iyo ka-jawaabista waxyeellada Rayidka (CHMTRU) ee wasaaradda gaashaandhigga taasoo raad-raacda, falanqeysa kana bixisa jawaab ku habboon waxyeellada soo gaarta rayidka xilliyada hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan.

### 1.3 Ahmiyadda Siyaasadda

Muhimadda ay leedahay siyaasadda bed-qabka rayidka waxaa ka mid ah:

i. Kala-caddeynta mas'uuliyadaha hay'adaha amniga iyo kuwa rayidka ee dawladda, bulshada rayidka iyo hay'adaha ka shaqeeya hawlaha gargaarka iyo bani'aadanimada;
ii. Sameynta hannaan iskuduwid oo ka dhexeeya bah-wadaagta fulinaysa siyaasaddan;
iii. Sare-u-qaadidda xirfadaha iyo awoodda ciidamada Amniga ee ilaalinta bed-qabka bulshada rayidka iyo hay'adaha rayidka ee dawladda;
iv. Ka-hortagga iyo xakamaynta gabood-fallada xilliyada ay dhacayaan hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan si loo ilaaliyo bed-qabka rayidka si waafaqsan xeerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah;
v. Xoojinta iyo sare-u-qaadidda kalsoonida ay bulshadu ku qabto ciidamada amniga si loo yareeyo cabashooyinka iyo carrada ka imaan karta bulshada;
vi. Xoojinta kormeerka iyo isla-xisaabtanka, warbixinnada iyo qaadidda tallaabooyinka wax lagu saxayo si loo adkeeyo ku-dhaqanka xeerarka ilaalinta bed-qabka rayidka; iyo
vii. Diyaarinta xogta rasmiga ah ee la xiriirta ilaalinta bed-qabaka rayidka iyo la-wadaagideeda dawladda Soomaaliya iyo daneeyeyaasha kale ee caalamka.

### 1.4 Waajibaadka Sharci ee Siyaasadda

1. Siyaasaddan waxaa saldhig u ah Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaysa dhammaan hay'adaha amniga iyo kuwa rayidka ah ee ku shaqada leh fulinta siyaasaddan.
2. Qodobbada Dastuurka Qaranka ee kala ah Qodobka 10aad (faqradaha 2 iyo 3), Qodobka 12aad (faqradda 2), Qodobka 15aad (faqradaha 1, 2 iyo 3), Qodobka 126aad (faqradda 4), Qodobka 127aad (faqradaha a, b, c, d iyo f), iyo Qodobka 128aad, dhammaantood waxay si cad u qeexayaan waajibka iyo mas'uuliyadda sharciyeed ee dawladda iyo hay'adaha amniga ee ku aaddan ka-hortagga waxyeellada rayidka, u-hoggaansanaanta sharciga, iyo isla-xisaabtanka.
3. Xeerka Difaaca, Qodobka 3aad, Faqraddiisa 4aad, iyo sidoo kale Xeerka Booliska, Qodobka 7aad, Faqradda (1), Faqrad-hoosaadka (a)(i), Faqrad-hoosaadka (c)(iv), iyo Faqradda labaad (2), Faqrad-hoosaadyada (a), (b), iyo (d), dhammaan qodobbadan waxay si cad u waajibinayaan ilaalinta bed-qabka rayidka, dhawrista nolosha iyo hantida shacabka iyo hubinta in hay'adaha amniga ay gutaan waajibaadkooda si waafaqsan sharciga iyo mabaadi'da ilaalinta bulshada.
4. Qaraarrada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay (UNSC Resolutions) ee ku xusan:

i. Qaraar Lambar (2022) oo lagu asaasay waajibaadka ATMIS oo Beddelay AMISOM si loo dhaqan-geliyo in mas'uuliyadda amni lagu wareejiyo hay'adaha Soomaaliyeed si tartiib-tartiib ah;

ii. Qaraaro Lambar 2710 (2023) iyo 2741 (2024) oo lagu dejiyey hal-beegyo lagu dhimayo waajibaadka ATMIS isla markaana lagu caddeynayo in hay'adaha Dawladda JFS ay la wareegayaan mas'uuliyadda amni iyo ilaalinta bed-qabka rayidka dhammaan gobollada Soomaaliya; iyo

iii. Qaraar Lambar 2767 (2024) oo lagu meel-mariyey dhammaadka hawl-galka ATMIS Diseembar 2024, waxaana lagu ansixiyey in hawl-galka AUSSOM uu bilaabanayo 1$^{da}$ Janaayo 2025, wuxuuna ku saleysnaa bixinta talooyinka amni iyo taageeridda hay'adaha amniga ee Soomaaliya.

5. Baaqa Golaha Nabadda iyo Amniga ee Midowga Africa (AUPSC) oo tirsigiisu yahay 1253 (2024) wuxuu qeexayaa waajibaadka, jihada istaraatijiyadeed iyo xudduudaha hawl-gal ee AUSSOM, isagoo adkaynaya hoggaaminta hay'adaha Soomaaliyeed, xasillinta, iyo ilaalinta bed-qabka rayidka. Waxa kale oo uu xaqiijinayaa kala-guurka laga wareegayo ka-qeyb-gal militari oo toos ah loona gudbayo lahaansho qaran oo buuxda oo ku saabsan maamulidda amniga Soomaaliya:

   i. Shuruucda Caalamiga ah ee bani'aadanimo- Dawladda Soomaaliya waxay ku biirtay afarta Heshiis ee Geneva ee 1949 (I–IV), kuwaasoo ah tiirarka asaasiga ah ee Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadanimada (IHL) ee xukuma hab-dhaqanka colaadaha iyo ilaalinta bed-qabka rayidka. Soomaaliya waxay saxiixday, balse weli aysan ansixin heshiisyada dheeraadka ah (Additional Protocols) I iyo II ee Heshiisyada Geneva. Si kastaba ha ahaatee, qodobbada siyaasaddan waxay ku dhisan yihiin waajibaadka asaasiga ah ee Heshiisyada Geneva iyo xeerarka khuseeya ee IHL-da caadiga ah (customary IHL);

   ii. Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka (2023). Qaab-dhismeedka amniga qaranka (2023) oo ay ansixiyeen golaha wada-tashiga bishii Maarso 2023 oo kala qeexaya maamulka hay'adaha amni. Wuxuu, sidoo kale, kala caddeynayaa mas'uuliyadaha ay kala leeyihiin hay'adaha Dawladda JFS iyo kuwa dawlad-goboleedyada ee khuseeyaa ilaalinta bed-qabka rayidka si waafaqsan waajibaadka iyo mas'uuliyadaha ilaalinta bed-qabka rayidka;

   iii. Istiraatijiyadda Qaran ee Xasillinta (2023-2027). Istiraatijiyaddu waxay la jaan-qaadaysaa hannaanka ilaalinta bed-qabka shacabka iyadoo ku xiraysa adeegyada dawladnimo ee dastuuriga ah sida Booliska, Cadaaladda iyo adeegyada dib-u-heshiisiineed. Siyaasadda ilaalinta bed-qabka rayidka waxay xoojinaysaa hannaan xasillin oo waarta taasoo leh u-hoggaansanaanta sharci, isku xir iyo isla-xisaabtan; iyo

   iv. Qorshaha Horumarinta Amniga Soomaaliya (SSDP-2023). SSDP wuxuu abuurayaa qaab-dhismeed istiraatiji ah oo dib-u-qaabayn loogu sameynayo arrimaha amniga Soomaaliya kuwaasoo ay ka mid yihiin hannaanka kor-

joogtaynta, Anshaxa iyo isla-xisaabtanka hay'adeed. Waxaa kaloo ka mid ah ballan-qaadyo lagu saleynayo ilaalinta bed-qabka rayidka qaab-dhismeedyada militariga iyo booliska Soomaaliyeed iyadoo la sii marinayo hannaanka qorsheynta nidaamyada, hab-raacyada iyo anshaxa hawl-gallada.

## 1.5 Baaxadda iyo Hay'adaha leh Fulinta Siyaasadda

1) Fulinta siyaasaddan kuma xaddidna marxaladan kala-guurka ah iyo hawl-gallada lagu xoraynayo deegaanada ay argagixisadu haysato. Waa siyaasad qaran oo si joogto ah loo fulinayo inta ay hawl-galladu socdaan iyo hawl-gal kasta oo yimaad mustaqbalka kuwaasoo laga fulinayo dhammaan dhulka juquraafi ahaan ay ka kooban tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Hawl-galladu ha ahaadeen kuwo ciidamada amniga soomaaliya ay gaar u fuliyaan, hawl-gal ay si wadajir ah u fuliyeen ciidamada dalalka saaxiibada la ah Soomaaliya ama hawl-gal lagu fuliyey taageero caalami ah. Siyaasaddan waxay khuseysaa dhammaan hay'adaha Federaalka iyo kuwa Dawlad-goboleedyada ee ka shaqeeya amniga, ka-hortagga isku-dhacyada hubaysan, xasillinta, maamulka deegaanada iyo hawlaha bini'aadanimada ee ka socda gudaha xudduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).
2) Xafiiska Amniga Qaranka (XAQ) wuxuu hubinayaa in Siyaasaddani ay la jaan-qaadayso yoolalka istiraatijiyadeed ee amniga qaranka. XAQ wuxuu fududaynayaa iskuduwidda heer Madaxweynaha iyo Golaha Amniga Qaranka si loo xaqiijiyo xoojinta fulinta siyaasadda ilaalinta rayidka.
3) Siyaasaddan waxaa fulinaya hay'adahan soo socda:
   i. Wasaaradaha bah-wadaagta ku ah fulinta oo ay ka mid yihiin Wasaaradda Gaashaandhigga, Wasaaradda Amniga Gudaha, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalaynta iyo Dib-u-heshiisiinta, Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Wasaaradda Qoyska iyo Arrimaha Xuquuqul Insaanka, Hay'adda SoDMA iyo Guddiga Qaran ee Qoxootiga iyo Barakaceyaasha, iyo hay'adaha dhigooda ah ee heer Dawlad-goboleed;
   ii. Ciidamada Amniga Soomaaliya oo ay ka mid yihiin Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (CXDS) iyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed (CBS) ee heer federaal iyo heer dawlad-goboleed, Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (HSNQ), Ciidamada Daraawiishta dawlad-goboleedyada iyo dhammaan hay'adaha la xiriira ee lagu xusay dastuurka iyo kuwa lagu xusay Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka kuwaaaoo hoos-yimaad nidaamka hay'adaha amniga ee heer federal iyo heer dawlad-goboleed;
   iii. Saaxiibada Soomaaliya ee hawlaha amni, sida hawl-galka AUSSOM iyo hawl-gallada kale ee imaan kara mustabqalka, sida jileyaasha dhinacyada badan leh (multilateral actors) iyo kuwa labo-dhinaclaha ah (bilateral) ee la yeelanaya

iskaashi amni iyo difaac dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);

iv. Unugyada amniga ee ka dhashay bulshada dhexdeeda (Community-based security units) oo ay dawladdu (heer federaal iyo dawlad-goboleed) u aqoonsan tahay oo ay ku jiraan Ciidamada Mutadawiciinta shacabka kuwaasoo hoos yimaad amarka, iskuduwidda, ama kormeerka iyo isla-xisaabtanka lagu qeexay Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka;

v. Hay'adaha bini'aadannimada, wakaaladaha horumarinta iyo ururrada bulshada rayidka ah ee ka hawl-gala dalka, kuwaasoo hawlaha ay qabtaan ay ka mid yihiin ilaalinta rayidka, faafinta digniinta degdegga ah ama gaarsiinta kaalmada rayidka. Hay'adahani waxay wada-shaqeyn la yeelanayaan hay'adaha dawladda si waafaqsan mabaadi'dooda madax-bannaanida iyo dhexdhexaadnimada ay ku shaqeeyaan; iyo

vi. Culumaau-diinka, odayaasha dhaqanka, samadoonada iyo hormuudka kala duwan ee bulshada, sida ururada haweenka iyo dhallinyarada kuwaasoo dowr muhiim ah ku leh bulshada marka ay timaad xallinta khilaafaadka, dib-u-heshiisiinta iyo iskuduubnida bulshada. Ka-qeyb-gelinta daneeyeyaashan waxay kaalin mug leh ka qaadanayaan dhisidda kalsoonida ay ku qabaan bulshadu hay'adaha amniga iyo kuwa rayidka ah ee dawladda si loo xoojiyo dadaallada ilaalinta bed-qabka rayidka ilaa heer degmo, beel, tuulo iyo bulsho.

## 1.6 Hannaanka Loo Maray Sameynta Siyaasadda

1) Siyaasaddan waxaa dejiyey Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaysa hay'adaha bah-wadaagta ku ah fulinta siyaasaddan. Xafiiska Ergayga Gaarka ah ee Xasillinta iyo Ilaalinta Dadka Rayidka ah oo matalaya Xafiiska Madaxweynaha JFS ayaa ku biiriyey taageero farsamo xilligii la qorayey siyaasaddan. Hay'adda CIVIC ayaa sidoo kale qeyb ka ahayd hannaanka sameynta siyaasadda iyadoo ku biirisay taageero farsamo taasoo xoojisay asaaska siyaasaddan.

2) Waxaa sidoo kale ka qeyb-galay kulamadii wada-tashiyada siyaasaddan wasaaradda amniga gudaha, xafiiska amniga qaranka, wasaaradda arrimaha gudaha, federaalka iyo dib-u-heshiisiinta iyo wasaaradda arrimaha qoyska iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo hay'adaha kale ee ku shaqada leh si loo xaqiijiyo waafaqsanaanta shuruucda dalka ee amniga iyo iskuduwidda hay'adaha.

3) Waxaa sidoo kale ka qeyb-galay wada-tashiyada lagu sameeyey siyaasaddan bulshada rayidka Soomaaliyeed iyo hay'adaha caalamiga ah ee ku shaqada leh bini'aadannimada, ilaalinta bed-qabka rayidka iyo xasillinta. Hannaankan wadajirka ah ee dejinta siyaasaddan wuxuu soo saaray qaab-dhismeed siyaasadeed oo ay hoggaaminayaan hay'adaha qaranka si waafaqsan xeerarka caalamiga iyo kuwa qaranka.

# QEYBTA 2 – QAAB-DHISMEEDKA SIYAASADDA

Qeybtani waxay qeexaysaa qaab-dhismeedka hay'adaha iyo hab-raacyada ay dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u fulinayso, ku dhaqan-gelinaysa, kuna kormeeraysa waajibaadkeeda ku xusan siyaasaddan.

## 2.1 Guud-marka Qaab-dhismeedka

Qaab-dhismeedka siyaasaddu wuxuu ka kooban yahay 5 (shan) tiir. Tiir kasta wuxuu ka turjumayaa xirfadaha hay'adeed iyo aagagga hawleed ee u gaarka ah. Dhammaan tiirarkani waxay dhisayaan nidaam qaran oo isku-duuban oo loogu talo-galay ilaalinta rayidka xilliyada colaadaha hubaysan, xasillinta iyo kala-guurka amniga. Tiirarka Siyaasaddani waa kuwan soo socda:

1) Tiirka 1aad: Xoojinta Iskuduwidda Rayidka iyo ciidanka (CIMIC).
2) Tiirka 2aad: La-xiriirka rayidka iyo maareynta khataraha.
3) Tiirka 3aad: Ilaalinta Bed-qabka Dadka Nugul.
4) Tiirka 4aad: Fulinta Siyaasadda ilaalinta rayidka, Kormeerka iyo isla-xisaabtanka.
5) Tiirka 5aad: Hay'adaynta iyo joogtaynta dhaqan-gelinta Siyaasadda.

## 2.2 Tiirka 1aad: Xoojinta Iskuduwidda Rayidka iyo Ciidanka (CIMIC)

### 2.2.1. Ujeeddada iyo Hawlaha

1) Wasaaradda Gaashaandhigga waxay xoojinaysaa qaab-dhismeedka sharci, hawl iyo hab-raacyada maamul ee CIMIC iyadoo la ilaalinayo madax-bannaanida iyo dhexdhexaadnimada hay'adaha ka shaqeeya arrimaha bani'aadannimada si waafaqsan xeerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah.
2) Dhisidda nidaam iskuduwid rayid iyo ciidan oo xoojiya ilaalinta bed-qabka rayidka, xasilloonida bulshada iyo fulinta hawl-gallada amni si waafaqsan shuruucda qaranka iyo kuwa caalamiga ah, iyadoo la xoojinayo wada-shaqeynta, kalsoonida bulshada, iyo ilaalinta adeegyada aasaasiga ah.
3) Xoojinta isku-xirka iyo wada-shaqeynta u dhexeysa ciidamada, hay'adaha rayidka, maamulka deegaanka iyo bahwadaagta ka shaqeeya hawlaha bani'aadannimo si loo yareeyo khataraha ay wajihi karaan rayidka, loo taageero iskuduwid hawlaha amniga iyo kuwa rayidka, loona fududeeyo ilaalinta rayidka, xasillinta bulshada iyo soo-kabashada deegaanada ay saameeyeen hawl-gallada.

### 2.2.2. Waajibaadka Sharci iyo Ma'suuliyadaha CIMIC

1) Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaysa Taliska Guud ee CXDS ayaa sameynaysa hab-raacyada, tilmaamaha iyo nidaamyada hawl-fulineed (SoPs) ee iskuduwidda rayidka iyo ciidanka, iyo ilaalinta bed-qabka rayidka.

2) CIMIC waxaa waajib ku ah in ay hubiso in hawl-gallada amnigu ay waafaqsan yihiin dastuurka qaranka, xeerarka dhaqan-galka ah, kuwa bani'aadannimada iyo xuquuqda aadanaha.
3) CIMIC waxay yeelanaysaa hannaan iskuduwid oo leh u-qeybsaneyaal ka kala imaanaya hay'adaha amniga ee leh fulinta siyaasadda si loo xoojiyo ka-hortagga waxyeellada rayidka iyo wadaagista xogta si waafaqsan xeerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah.
4) CIMIC waxay ilaalinaysaa bed-qabka rayidka, hantidooda iyo kaabeyaasha muhiimka u ah rayidka inta lagu guda-jiro hawl-gallada amni.
5) CIMIC waxay taageeraysaa dadaallada ka-hortagga iyo yareynta waxyeellada rayidka.
6) CIMIC waxay mas'uul ka tahay iskuduwidda xiriirka rayid iyo ciidan, iyo wada-shaqeynta hay'adaha dawliga ah, kuwa bani'aadannimada iyo maamullada deegaanada.
7) CIMIC waxay mas'uul ka tahay la-socodka iyo diiwaan-gelinta waxyeellada rayidka iyo falanqaynta saameynta hawl-gallada amni.
8) Soo-jeedinta tallaabooyinka lagu hagaajinayo qorsheynta hawl-gallada amni iyo yareynta khataraha rayidka.
9) Xoojinta kalsoonida iyo wada-shaqeynta ciidamada iyo bulshada iyadoo la kaashanayo unugyada amni ee bulshada.
10) Taageeridda hawlaha iyo dadaallada u-jawaab-celinta rayidka iyo hawlaha iskuduwidda marka ay dhacdo waxyeello soo gaarta rayidka.
11) Sameynta qiimeyn joogta ah oo ku saabsan khataraha rayidku wajihi karo iyo saameynada ka dhasha hawl-gallada amni
12) Fududaynta is-weydaarsiga xogta iyo wada-shaqeynta ka dhaxeysa hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasaddan.
13) Hubinta in hawl-wadeennada CIMIC ay qaataan tababaro joogta ah oo la xiriira ilaalinta rayidka, xeerarka bani'aadannimada, kuwa xuquuqda aadanaha iyo shuruucda dalka.
14) Taageeridda dadaallada dib-u-soo-kabashada bulshada, ilaalinta adeegyada asaasiga ah, iyo ka-hortagga xaaladaha nuglaanta ee kordhin kara khatarta rayidka inta lagu guda-jiro iyo ka dib hawl-gallada amniga.
15) CIMIC waxay dowr muhiim ah ka qaadanaysaa taageeridda hawlaha Unugga Daba-galka, Yareynta iyo ka-jawaabista waxyeellada Rayidka ee Wasaaradda Gaashaandhigga.

### 2.2.3. Mabaadi'da Hagaysa Hawlaha CIMIC

Mabaa'diida hagaysa hawlaha Iskuduwidda Rayidka iyo Ciidanka waxa eey dejinayaan saldhigga guud ee lagu hago qorsheynta, iskuduwidda, iyo fulinta hawlaha CIMIC. Mabaa'diida hagaysa hawlaha CIMIC waa kuwan hoos ku xusan:

1) Bed-qabka-Rayidka.

2) Sharci-u-Hoggaansanaan.
3) Xuquuq-Aadanaha.
4) Bani'aadannimo.
5) Dhexdhexaadnimo.
6) Madax-bannaani.
7) Eex-la'aan.
8) Iskuduwid.
9) Isla-xisaabtan.

### 2.2.4. Hagidda iyo Kormeerka Hawlaha CIMIC

Hagidda iyo kormeerka hawlaha CIMIC waxay yeelanayaan 2 (labo) heer oo kala ah Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliska Guud ee CXDS.

A. Heerka kowaad- Dowrka Wasaaradda Gaashaandhigga wuxuu yahay:

i. Dejinta siyaasadaha, tilmaamaha iyo nidaamyada hawl-fulineed (SoPs) iyo hagidda istiraatijiga ah ee hawlaha CIMIC;

ii. Kormeerka waafaqsananaanta hawlaha CIMIC ee ilaalinta bed-qabka rayidka; iyo

iii. Hagista iskuduwidda u dhexeysa CIMIC iyo hay'adaha dawladda iyo kuwa caalamiga ah.

B. Heerka labaad- Dowrka Taliska Guud ee CXDS wuxuu yahay:

i. Taageeridda iskuduwidda hawlaha CIMIC ee heer Talis Guud, Talis Qeybeed iyo heer hawl-gal;

ii. La-socodka iyo kormeerka fulinta hawlaha CIMIC iyo u-hoggaansanaanta siyaasadda ilalainta rayidka; iyo

iii. Soo-saarista warbixinno joogto ah oo ku saabsan hawlaha CIMIC, gaar ahaan xaaladda rayidka iyo khataraha jira.

C. Hannaanka Wada-shaqeyn ee CHMTRU iyo CIMIC

CHMTRU iyo CIMIC waxay u wada-shaqeynayaan habkan hoos ku xusan;

i. Wadaagista xogta iyo warbixinnada jiidda hore ee xaaladda rayidka, khataraha iyo waxyeellada rayidka soo gaarta;

ii. CHMTRU oo kaashanaysa CIMIC ayaa ka shaqeynaysa diyaarinta warbixinnada, falanqaynta xaaladaha iyo soo-saarista warbixinnada khuseeya bed-qabka rayidka ka dib hawl-gal kasta ee ciidan;

iii. U-soo-jeedinta Taliska Guud iyo Wasaaradda Gaashaandhigga talooyinka wax-ku-ool ah ay u hagto go'aan-qaadashada, kormeerka iyo horumarinta siyaasaddan;

iv. Soo-jeedinta tallaabooyinka lagu yareynayo waxyeellada rayidka iyo hagaajinta hab-raacyada hawl-gal; iyo

v. Natiijada falanqaynta xogta iyo casharada laga baran karo hawl-galkasta waxaa loo gudbinayaa Taliska Guud ee CXDS iyo Wasaaradda Gaashaandhigga si loogu saleeyo qorsheynta hawl-gallada xiga iyo horumarinta hawlaha ilaalinta bed-qabka rayidka.

## 2.3 Tiirka Labaad: Wargelinta Rayidka ee Khataraha Ka Hor Inta Aysan Bilaaban Hawl-gallada Amni

### 2.3.1. Ujeeddada iyo Hawsha

1) Tiirkani wuxuu diiradda saarayaa qaab-dhismeedka sharciyeed ee DJFS u gudanayso waajibaadkeeda la xiriira la-wadaagista rayidka xogaha khatarta ka hor inta aan la bilaabin hawl-gallada, inta lagu guda-jira iyo ka dib marka ay hawl-gallada dhammaadaan si waafaqsan Dastuurka dalka, xeerarka dhaqan-galka ka ah JFS iyo kuwa caalamiga ah.
2) Tiirkani wuxuu caddeynayaa hannaanka iyo iskuduwidda loo marayo gaarsiinta rayidka xogaha iyo warbixinnada khatarta ee ay wajihi karaan ka hor hawl-gallada amni, inta lagu guda-jiro iyo ka dib si loo yareeyo ama looga baaqsado waxyeellayn soo gaarta rayidka.
3) Gaarsiinta xogaha la xiriira khatarta waxaa loo marayaa adeegsiga hannaanka gaarsiinta rayidka digniinaha hore iyo jawaab-celinta degdegga ah (early warning and response network– EWRN) oo uu hoggaaminayo unugga xiriirka ee Wasaaradda Gaashaandhigga. Hannaankan wuxuu yeelanayaa qaab iskuduwid oo u dhexeeya hay’adaha amniga iyo kuwa rayidka, bulshada rayidka, dadka rayidka ah iyo hay’adaha gargaarka.
4) Nidaamka Digniinta Hore iyo Jawaab-celinta (EWRN) waa aalad muhiim u ah ilaalinta bed-qabka rayidka iyadoo lagu hubinayo bixinta digniin hore, jawaab-celin degdeg ah iyo yareynta waxyeellada rayidka inta lagu jiro hawl-gallada amniga ama xilliyada ay jiraan colaadaha hubaysan. Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa mas’uul ka ah hagidda istiraatijiga ah, kormeerka, iyo iskuduwidda, halka Taliska Guud uu qaabilsan yahay hirgelinta hawlaha. CIMIC iyo Unugga Daba-galka Waxyeellada Rayidka ayaa taageeraya nidaamka iyagoo xoojinaya xiriirka rayid-ciidan, la-socodka waxyeellada rayidka iyo horumarinta joogtada ah ee nidaamka si loo xaqiijiyo ilaalinta rayidka iyo waafaqsanaanta xeerarka dalka iyo shuruucda caalamiga ah.

### 2.3.2 Waajibaadka Sharciyeed iyo Hay’adeed ee Nidaamka Digniinta Hore iyo Jawaab-celinta (EWRN)

Iyadoo la tixraacayo ujeeddada tiirkan, waajibaadka sharciyeed ee Nidaamka Digniinta Hore iyo Jawaab-celinta (EWRN) waxay ka kooban yihiin qodobbadan hoos ku xusan:

1) Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaysa Taliska Guud ayaa mas'uul ka ah sameynta istaraatijiyadda EWRN iyo tilmaamaha fulin (SoPs) ee istaraatijiyada. Hay'adaha kale ee amniga iyo kuwa bah-wadaagta ka ah ilaalinta bed-qabka rayidka ayaa qeyb ka noqonaya diyaarinta istaraatijiyadda iyo tilmaamaha fulin.
2) Ogaanshaha iyo Qiimeynta Khataraha (Risk Detection and Assessment): Taliska Guud oo kaashanaya CIMIC ayaa mas'uul ka ah ururinta, falanqaynta heerka halista jirta ee ku wajahan rayidka iyo dadka nugul isla markaana la wadaagaya hay'adaha amniga iyadoo la isticmaalayo nidaamka EWRN.
3) Go'aaminta Heerka Digniinta (Threat Classification and Decision): Taliska Hawl-galka iyo Unugga xiriirka ee Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa go'aaminaya heerka digniinta, xaqiijinta saxnaanta iyo amniga xogta, iyo oggolaanshaha sii-daynta digniinta rayidka.
4) Gaarsiinta Digniinta Hore ee Rayidka (Early Warning Dissemination): Unugga Xiriirka ee Wasaaradda Gaashaandhigga, Taliska Hawl-galka iyo CIMIM ayaa mas'uul ka ah gaarsiinta digniinta hore rayidka iyadoo la adeegsanayo habka ugu habboon, sida warfaafinta, fariimaha, hoggaanka bulshada iyo maamulka deegaanka. Waxaa muhiim ah in ay fariintu tahay mid xambaarsan badbaadin rayid oo la fahmi karo.
5) Iskuduwidda Jawaab-celinta Degdegga ah (Coordinated Response): Iyadoo la adeegsanayo iskuduwidda ay hoggaaminayso Wasaaradda Gaashaandhigga, hay'adaha Amniga, kuwa rayidka, Maamulka Deegaanka iyo Hay'adaha Gargaarka waxay mas'uul ka yihiin dhaqaajinta badbaadinta rayidka iyo gaarsiinta dadaallada bani'aadannimo.
6) Kormeerka, La-socodka Saameynta iyo Warbixinta (Monitoring, Impact and Tracking, and Reporting): CHMTRU iyo CIMIC ayaa mas'uul ka ah la-socodka waxyeellada rayidka, qiimeynta hawlaha digniinta hore iyo jawaab-celinta degdegga ah (EWRN), ururinta xogta iyo casharrada laga baran karo iyo soo-gudbinta warbixinno joogta ah.

## 2.4 Tiirka Saddexaad: Ilaalinta Bed-qabka Dadka Nugul

**2.4.2** Tiirkani wuxuu qeexayaa tallaabooyinka hay'adeed ee lagama-maarmaanka u ah ilaalinta xuquuqda, badbaadada iyo karaamada dadka nugul xilliyada kala-guurka amniga, hawl-gallada xasillinta iyo colaadaha hubaysan. Ilaalinta bed-qabka dadka nugul waxay ku saleysan tahay ogaanshaha khataraha gaarka u ah ee ay wajihi karaan, xuquuqdooda gaarka ah si waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa caalamiga ah.

### 2.4.3 Ujeeddada Iyo Hawlaha

1) Xoojinta hab-raacyada iyo tallaabooyinka hawl-gal ee ilaalinta bed-qabka dadka nugul oo ay ku jiraan caruurta, haweenka, dadka waayeelka ah, dadka baahiyaha gaarka ah qaba, barakaceyaasha gudaha iyo dadka la hayb-sooco xilliyada

colaadaha hubaysan iyo hawl-gallada ciidan iyadoo la dhawrayo waajibaadka sharciyeed ee qaran iyo kuwa caalamiga ah ee la xiriira ilaalinta dadka nugul.

2) Aqoonsiga iyo qiimeynta khataraha gaarka ah ee ku wajahan dadka nugul ka hor, inta lagu guda-jiro hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan si loo xaqiijiyo tallaabooyinka ka-hortagga iyo jawaab-celin ku saleysan xog dhab ah.
3) Xoojinta iskuduwidda u dhexaysa ciidamada, hay'adaha rayidka iyo kuwa gaarka u shaqeeya iyadoo la hubinayo in qorsheynta amniga, hawl-gallada, iyo jawaab-celinta ay si buuxda u tixgeliyaan nuglaanshaha dadka.
4) Sameynta iyo xoojinta hannaanno gudbin (referral pathways) oo u oggolaanaya dadka nugul inay helaan adeegyada sharci, caafimaad, nafsadeed iyo bani'aadannimo iyo in la hubiyo helitaanka cadaalad iyo mag-dhaw marka ay dhacaan xad-gudubyo.
5) Dhisidda awoodda hay'adaha amniga iyo kuwa rayidka ah ee la xiriirta ilaalinta dadka nugul iyadoo la adeegsanayo tababarrada, hagitaanka iyo dhaqan-gelinta hab-raacyada tixgelinaya da'da, jinsiga, naafanimada, barakaca iyo xaaladaha kale ee ay ku sugnaan karaan dadka nugul.
6) In la xoojiyo isla-xisaabtanka iyo tallaabooyinka looga hortagayo xad-gudubyada lagula kacayo dadka nugul.
7) La-socodka, qiimeynta iyo daba-galka xaaladda dadka nugul ka dib marka ay dhammaadaan colaadaha hubaysan ama hawl-gallada amni si loo hubiyo soo-kabashadooda, wax-ka-qabashada saameynta ka dhalatay hawl-gallada amni iyo ka-hortagga waxyeellada rayidka ee dhici kara.

### 2.4.4 Waajibaadka Sharciyeed iyo Kuwa Hay'adeed

Qeybtani waxay qeexaysaa mas'uuliyadaha iyo waajibaadka hay'adaha dawladda ee ka shaqeeya ilaalinta bed-qabka dadka nugul xilliyada colaadaha hubaysan iyo hawl-gallada amni si waafaqsan dastuurka dalka, xeerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah.

### 2.4.5 Wasaaradda Gaashaandhigga

a. Hirgelinta iyo kormeerka siyaasadda bed-qabka rayidka oo ay mudnaanta kowaad leeyihiin ilaalinta bed-qabka dadka nugul xilliyada hawl-gallada milatari ama colaadaha hubaysan;

b. Sameynta hab-raacyada iyo xeerarka hawl-gallada iyadoo la falnqaynayo nuglaanshaha rayidka iyo goobaha ay ku sugan yihiin marka la sameynayo qorsheynta hawl-gallada ciidan; iyo

c. Iskuduwidda dhammaan hay'adaha amniga iyo kuwa rayidka ee ku shaqada leh hirgelinta siyaasaddan iyadoo ay Wasaaradda Gaashaandhiggu ay shir-guddoominayso madasha qaran ee ilaalinta bed-qabka caruurta si loo wada fuliyo qorshaha qaran ee ilaalinta bed-qabka caruurta xilliyada colaadaha hubaysan ama hawl-gallada amni.

### 2.4.6 Ciidanka Xoogga Dalka

a) In Ciidanka Xoogga Dalka uu ku saleeyo ilaalinta bed-qabka dadka nugul xilliyada la qorsheynayo hawl-gallada iyadoo la qiimeynayo heerka khataraha ay wajihi karaan dadkda nugul;

b) Ciidanku waa in uusan gaarsiin waxyeellayn dadka rayidka xilliyada lagu guda-jiro hawl-gallada iyagoo qaadaya tallaabooyin lagu badbaadinayo rayidka nugul iyo in la xaddido hawl-gallada amni ee xilliyada ay lagama-maarmaanka tahay;

c) Astaynta goobaha iyo la-socodka dhaqdhaqaaqa dadka nugul, sida goobaha barakaceyaasha gudaha, dugsiyada waxbarasho, goobaha caafimaadka, xarumaha cibaadada iyo kaabeyaasha rayidka ka hor iyo ka dib hawl-gallada ciidan;

d) Ka-hortagga, baarista iyo wax-ka-qabashada xad-gudubyada ay geystaan xubnaha ciidanka iyadoo lagu qaadayo xeerka anshaxa ciidanka, xeerarka hawl-gallada, xeerarka kale ee dhaqan-galka ka ah dalka iyo kuwa caalamiga ahba;

e) Iskuduwidda hay'adaha rayidka iyo CIMIC si loo fududeeyo tallaabooyinka ilaalinta bed-qabka rayidka nugul, fududaynta gaarsiinta adeegyada ay u baahan yihiin iyo u-jawaab-celinta dadka ay saameeyeen hawl-gallada amni;

f) Ciidanku waa in uu si bani'aadannimo leh ula dhaqmaa dadka nugul inta lagu guda-jiro hawl-gallada ciidan, ama ay socdaan baaritaannada amni si waafaqsan hab-raacyada hawl-gallada amniga iyadoo la ilaalinayo karaamada, bed-qabka iyo sharafta dadka nugul si waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa caalamiga ah; iyo

g) Sameynta qiimeyn hawl-gallada milatari ka dib si loo cabbiro saameynta hawl-gallada, casharrada laga baran karo iyo qaadista tallaabooyin sixid iyo ka-hortag hawl-gallada mustaqbalka.

### 2.4.7 Wasaaradda Amniga Gudaha

a) Sameynta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo hab-raacyada hawlaha amniga gudaha ka dib xoraynta goobaha lagala wareego cadowga;

b) Kor-joogtaynta hawlaha amniga gudaha ee ciidanka daraawiishta iyo booliiska Soomaaliyeed ee gacanta ku haya deegaannada iyo goobaha ay ku nool yihiin rayidka si waafaqsan xeerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah; iyo

c) Xiriirinta iyo iskuduwidda hawlaha ilaalinta bed-qabka rayidka ee hay'adaha ka shaqeeya amniga gudaha.

### 2.4.8 Booliska iyo Ciidanka Daraawiishta

a) Ciidanka daraawiishta oo qeyb ka ah hawl-gallada ciidan waxay mas'uul ka yihiin ilaalinta rayidka gaar xilliyada hawl-gallada amni ay socdaan iyo la-wareegidda mas'uuliyadda gacan-ku-haynta/xajinta goobaha ciidamadu xoreeyeen;

b) Boolisku wuxuu mas'uul ka yahay ilaalinta rayidka iyo dadka nugul iyadoo la dhaqan-gelinayo xeerarka qaranka, kuwa caalamiga ah iyo sameynta nidaamka nabad-ilaalinta bulsho (community policing);

c) Boolisku wuxuu mas'uul ka yahay ka-hortagga iyo ka-jawaab-celinta rabshadaha iyo xad-gudubyada loo geysto rayidka, gaar ahaan kuwa nugul;

d) Boolisku wuxuu mas'uul ka yahay ilaalinta amniga xeryaha barakaceyaasha gudaha, goobaha rayidka iyo kuwa dadka nugul iyo ilaalinta kaabeyaasha muhiimka u ah rayidka; iyo

e) Boolisku wuxuu mas'uul ka yahay fududaynta gaarsiinta adeegyada ay u baahan yihiin rayidka, gaar ahaan kuwa nugul.

### 2.4.9 Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta

a. Hoggaaminta hawlaha xasillinta si waafaqsan istiraatijiyadda qaran ee xasillinta;

b. Caawinta iskuduwidda ciidamada amniga iyo bulshada heerarka qaran, dawlad-goboleed iyo mid degmo; iyo

c. Ku-saleynta hawlaha xasillinta mabda'a ilaalinta rayidka, hoggaaminta hawlaha dib-u-heshiisiinta, ka-hortagga iyo xallinta khilaafaadka bulshada iyo hawlaha xiriir ee bulshada si loo yareeyo khataraha soo wajihi kara rayidka iyo kuwa nugul.

### 2.4.10 Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqda Aadanaha

a) Sameynta siyaasadaha iyo hab-raacyada lagu ilaalinayo dumarka, gabdhaha iyo caruurta xilliyada colaadaha iyo hawl-gallada amni

b) Xiriirinta iyo iskuduwidda hawlaha ka hortagga iyo ka jawaabista xadgudubyada iyo rabshadaha loo geysto dumarka, gabdhaha iyo caruurta

c) Samaytna hab-raacyo iyo Hirgellitna hannaanka gaarsiinta adeegyada (referral pathways) ee dhibbanayaasha hadii ay ahaan lahaayeen gaarsiinta dawoyiinka, adeegyada caafimaad, mid nafsiyeed iyo mid sharci

d) Qorsheynta iyo falanqaynta ilaalinta dumarka, gabdhaha iyo caruurta xilliyada hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan iyo ku daridda qaab-dhismeedka guud ee ilaalinta dumarka, gabdhaha iyo caruurta.

### 2.4.11 Wasaaradda Caafimaadka

a. Fududaynta iyo gaarsiinta adeegyada caafimaad ee degdegga ah goobaha ay ka dhacayaan hawl-gallada ciidan ama ay ka jiraan colaadaha hubaysan;

b. Bixinta daryeel caafimaad, adeegyada caafimaadka ee jir ahaan iyo dhimmir ahaanba, iyo daaweynta la xiriirta xad-gudubyada kufsiga; iyo

c. Xiriirinta iyo iskuduwidda hay'adaha amniga ee gaarsiinta agabka caafimaad goobaha ay ka dhacayaan hawl-gallada amni ama ay ka jiraan colaadaha hubaysan.

### 2.4.12 Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada

a) Ilaalinta bed-qabka caruurta iyo dadka nugul iyadoo laga hortagayo shaqaaleysiinta caruurta ee ciidanka, shaqaaleysiinta khasabka iyo ku-dul-noolaanshaha xilliyada colaadaha ama hawl-gallada amni; iyo

b) Gaarsiinta caawinta ilaalinta bulshada (social protection) dadka ay colaaduhu saameeyeen.

### 2.4.13 Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka

a. Sameynta hab-raacyada cadaaladda, baaritaanno sharci, dacwad-oogis iyo isla-xisaabtan ku saabsan xad-gudubyada lagula kaco rayidka iyo dadka nugul;

b. Ka-shaqeynta helitaanka cadalaad, caawimaad sharci iyo mag-dhaw la siiyo dhibbaneyaasha; iyo

c. Hubinta hab-raacyada garsoorka in si sax loo fuliyey marka ay yimaadaan dacwadaha xad-gudubyada lagula kaco rayidka xilliyada colaadaha hubaysan ama hawl-gallada amni.

### 2.4.14 Hay'adda Maareynta Musiibooyinka

a) Iskuduwidda hawlaha maareynta Musiibooyinka, gaarsiinta gargaarka, bixinta jawaabta degdegga ah iyo daad-guraynta rayidka iyo dadka nugul xilliyada ay dhacayaan Musiibooyinka; iyo

b) Dhex-gelinta qaab-dhismeedka ilaalinta rayidka hawlaha gurmad-bixinta Musiibooyinka iyo taageeridda nidaamyada digniinaha hore iyo gudbinta dhacdooyinka iyo mugga saameyntooda.

### 2.4.15 Guddiga Qaran ee Qaxootiga iyo Barakaceyaasha Gudaha

a. Ilaalinta bed-qabka barakaceyaasha iyo qaxootiga iyadoo la hubinayo bed-qabka dadka ku nool xeryaha/kaamamka iyo fududaynta helitaanka adeegyada si waafaqsan shuruucda qaranka iyo kuwa caalamiga ah; iyo

b. Gaarsiinta barkaceyaasha iyo qaxootiga adeegyada ilaalinta bulshada.

### 2.4.16 Guddiga Madaxa-bannaan ee Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha

a) Hubinta u-hoggaansanaanta xeerarka ilaalinta bed-qabka rayidka xilliyada hawl-gallada ciidan ama colaadaha hubaysan;

b) Baaridda cabashooyinka rayidka iyo sameynta warbixinnada la xiriira rabshadaha saameeya dadka nugul; iyo

c) Bixinta talooyin wax lagu saxayo iyo dadaallada ka-hortagid.

### 2.4.17 Sameynta Qiimeynta Khataraha iyo Nuglaanshaha Rayidka

1) Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa hubinaysa in hawl-gallada amni iyo kuwa milatari lagu saleeyo qiimeyn lagu sameeyey nuglaanshaha rayidka, gaar ahaan kuwa nugul.

2) Dhammaan hawl-gallada amni ee khatarta sare leh, gaar ahaan hawl-gallada lagu fulinayo goobaha rayidku ku badan yahay, sida magaalooyinka, guryaha, hawl-gallada habeenkii iyo isticmaalka hubka culus waa in lagu saleeyo mabda'a yareynta waxyeellada rayidka (Civilian Harm Mitigation) iyadoo la adeegsanayo habab hawl-gal oo taxaddar leh, xulashada bar-tilmaameedyo sax ah, iyo adeegsiga awood ku kooban heerka lagama-maarmaanka ah.

3) Ka hor fulinta hawl-gal kasta oo amni ama mid militari oo ay suurta-gal tahay in uu saameeyo goob rayid, taliyaha hawl-galka waa in uu hubiyaa in la sameeyey qiimeyn cad oo ku saabsan joogitaanka rayidka (Civilian Presence Assessment), taasoo lagu darayo go'aanka hawl-galka. Qiimeyntu waa in ay tixgelisaa dadka ku nool ama ka ag dhow goobta, wakhtiga hawl-galka (maalin/habeen, salaad, dugsi, suuq) iyo kaabeyaasha rayidka (guryo, isbitaallo, masaajidyo, suuqyo). Haddii aan si meel-mar ah loo xaqiijin karin in goobtu ka maran tahay rayid, hawl-galka waa in dib loo dhigo, wax laga beddelo ama loo fuliyo hab kale oo khatar yar.

4) Haddii inta lagu guda-jiro hawl-gal amni ay soo baxdo xog muujinaysa in khatarta rayidka ay korortay, taliyaha hawl-galka waxaa waajib ku ah in uu joojiyo, dibna u qiimeeyo ama u gudbiyo go'aanka heer talis oo ka sarreeya. Joojinta hawl-galka waa khasab marka adad rayid ah lagu arko goobtii bar-tilmaameedka ahayd ama la helo xog cusub oo muujinaysa in goobtu tahay mid rayid.

5) Mas'uuliyadda ugu dambaysa ee go'aanka hawl-galka marka khatar rayid jirto waxay si toos ah u saaran tahay taliyaha hawl-galka iyo taliska ka sarreeya ee ansixiyey hawl-galka. Ku-guul-darreysiga joojinta, dib-u-qiimeynta ama gudbinta hawl-gal khatar rayid leh waxaa loo tixgelinayaa ku xad-gudub waajibaadka ilaalinta bed-qabka rayidka.

6) Qodobbadan siyaasadeed ma beddelayaan Xeerarka Hawl-galka (ROE), balse waxay hagayaan go'aannada hawl-gal ee heer siyaasadeed iyo talis si loo xaqiijiyo in ilaalinta rayidku leedahay mudnaan joogto ah.

### 2.4.18 Sameynta Hannaan Gudbin iyo Fududaynta Helidda Adeegyada

Wasaaradda Caddalaada iyo arrimaha dastuurka, Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqda Aadanaha iyo Wasaaradda Caafimaadka ayaa mid walba waxay sameynaysa hannaan gudbin (referral pathways) oo fududaynaya gaarsiinta dadka nugul adeegyo cadaalad, caafimaad, nafsiyadeed, sharci iyo mid bani'aadannimo.

### 2.4.19 L-socodka, Warbixin diyaarinta iyo Isla-xisaabtanka

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ayaa sameynaysa nidaam lagu diiwaan-geliyo laguna baaro xad-gudubyada ay la kulmaan dadka nugul xilliyada hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan. Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqda Aadanaha ayaa sameynaya la-socod guud iyo diyaarinta warbixin madax-bannaan isagoo mar walba la tashanaya hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasaddan.

### 2.4.20 Sameynta Qiimeynta Hawl-gallada

Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Wasaaradda Amniga Gudaha ayaa sameynaya qiimeyn hawl-gallada amni ka dib si loo qaado tallaabooyin sixid ah oo looga hortagayo waxyeellada ku imaan karta dadka nugul.

## 2.5 Tiirka Afaraad: Kormeerka, Isla-xisaabtanka iyo Dhaqan-gelinta Siyaasadda

### 2.5.1 Ujeeddada iyo Hawlaha

1) Tiirkani wuxuu dhisayaa nidaamka qaran ee isla-xisaabtanka iyo kormeerka si loo xaqiijiyo ilaalinta rayidka ay tahay waajibaad sharci oo dastuuri marka la fulinayo hawl-gallada amni ama ay jiraan colaadaha hubaysan.

2) Kormeerka iyo dhaqan-gelinta siyaasaddan waxaa loo fulinayaa 3 (saddex) heer oo kala ah:

   a. Kormeerka hawl-gallada si loo sameeyo xaqiijinta fulinta hab-raacyada ilaalinta rayidka, xaqiijinta dhacdooyinka xad-gudubyada iyo iskudubaridka jawaab-celinta degdegga ah;
   b. Qabashada kulamada iskudubaridka ee farsamo ee heer wasaaradeed si loo qiimeeyo heerka fulinta siyaasadda iyo u-hoggaansanaanteeda; iyo
   c. Sameynta kormeer madaxeed oo waqtiyeysan si loo xaqiijiyo dacwadaha xad-gudubyada iyo soo-saarista warbixinno madax-bannaan ee la xiriira ilaalinta bed-qabka rayidka.

### 2.5.2 Waajibaadka Sharciyeed iyo Kuwa Hay'adeed

a) Unugga yareynta iyo jawaab-celinta dhibaatooyinka rayidka xilliyada hawl-gallada ama colaadaha hubaysan (CHMRU) ee Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaya Wasaaradda Amniga Gudaha ayaa raad-raac, xaqiijin iyo baaritaanno ku sameynaya xad-gudubyada iyo dhacdooyinka ay wajahayaan rayidka xilliyada hawl-gallada ama colaadaha hubaysan;

b) CHMRU oo kaashanaysa Wasaaradda Amniga ayaa xaqiijinaysa xogaha iyo warbixinnada la xiriira dhibaatooyinka soo gaara rayidka iyadoo si ammaan ah loo keydinayo xogaha dhibaatooyinka rayidka soo gaara, isla markaana siinaysa jawaab-celinta ku habboon iyadoo loo kaashanayo hay'adaha ku shaqada leh;

c) CHMRU waxay ku soo bandhigaysaa xogaha iyo warbixinnada la xaqiijiyey kulamada saddex-biloodlaha ah ee guddiyada iskudhafka ah ee heer hay'adaha ku shaqada leh, fulinta siyaasaddan ayaa waxaa shir-guddoominaya Wasaaradda Gaashaandhigga;
d) Xogaha iyo warbixinnada ay soo bandhigto CHMRU ayaa lagu dhammeystirayaa xaqiijintooda iyo hubintooda, isla markaana lagu ansixinayaa kulanka guddiga iskudhafka ah ee hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasaddan;
e) Dawladda JFS waxay ku waajibinaysaa in dhammaan hawl-gallada amni iyo milatari lagu saleeyo ka-hortagga waxyeellada rayidka, iyadoo la sameynayo qiimeyn hore oo khasab ah kuna saabsan khataraha suurta-galka ah ee rayidka (Civilian Harm Risk Assessment) ka hor ansixinta hawl-gal kasta;
f) Qiimeyntani waa shuruud asaas u ah go'aanka hawl-galka, waxaana ay mudnaan siinaysaa ka-hortagga waxyeellada rayidka ka hor fulinta, halkii laga sugi lahaa jawaab ka dib marka waxyeello dhacdo;
g) Wasaaradda Gaashaandhigga, iyadoo kaashanaysa Unugga Yareynta, Diiwaan-gelinta iyo Ka-jawaabista Waxyeellada Rayidka (CHMRU), waxay dejinaysaa liis hubin oo lagu yareeynayo waxyeellada rayidka (Civilian Harm Mitigation Checklist), kaasoo si waajib ah loogu dabaqayo dhammaan hawl-gallada khatarta sare leh. Liiskan hubinta ahi wuxuu hagayaa qorsheynta hawl-galka, xulashada hab-fulinta, iyo go'aannada la xiriira wakhtiga, goobta, iyo nooca awoodda la adeegsanayo si loo yareeyo khataraha rayidka;
h) Dowrka CHMRU kuma koobna oo keliya diiwaan-gelinta iyo xaqiijinta waxyeellada rayidka ka dib marka ay dhacdo, balse wuxuu, sidoo kale, kaalin firfircoon ka qaadanayaa falanqaynta khataraha, talo-bixinta ka-hortagga, iyo hagidda qorsheynta hawl-gallada si loo yareeyo waxyeellada rayidka;
i) Hannaanka ilaalinta bed-qabka rayidka ee Dawladda JFS wuxuu ku dhisan yahay 3 (saddex) heer oo isku xiran:
   1) Ka-hortagga waxyeellada rayidka;
   2) Jawaab-celinta deg-degga ah marka waxyeello dhacdo; iyo
   3) Isla-xisaabtan sharci iyo mid hay'adeed.
j) Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaysa dhammaan hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasaddan ayaa diyaarinaysa Ajendaha kulamada saddex-biloodlaha ah, diyaarinta warbixinnada kulanka iyo go'aannada ka soo baxa, iskudubaridka hawlaha iyo qorsheyaasha ka dhasha fulinta siyaasddan;
k) Hay'adaha ka midka ah guddiga iskudhafka ah ee hirgelinta siyaasaddan ayaa soo bandhigaya waxqabadkooda saddex-biloodlaha ah si waafaqsan qorshaha la isla ansixiyey ee fulinta siyaasaddan;
l) Warbixinnada iyo xogaha lagu ansixiyo kulanka guddiyada iskudhafka ah ee hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasaddan ayaa loo gudbinayaa Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqda Aadanaha si uu u sameeyo xaqiijin madax-

bannaan, isla markaasna u soo saaro talooyinka ku habboon ilaalinta bed-qabka rayidka; iyo

m) Dhammaan xogaha iyo warbixinnada la xiriira waxyeellada soo gaarta rayidka waxaa lagu maamulayaa hab-raaca ilaalinta xogta culus iyadoo loo keydinayo hab iyo goob ammaan ah oo asturaan, loona isticmaalo oo keliya adeeg-siinta (sida sharci, caafimaad iyo mid nafsadeed) dadka waxyeelladu soo gaarto xilliyada hawl-gallada ciidan ama colaadaha hubaysan.

### 2.5.3 La-shaqeynta Bulshada iyo Diyaarinta Hababka Soo-gudbinta Cabashada

Dawladda Soomaaliya waxay xaqiijinaysaa in rayidku u soo gudbiyaan cabashooyinkooda si ammaan ah oo fudud iyadoo la adeegsanayo habab cabasho-gudbin oo la aamini karo si loo ilaaliyo bed-qabka rayidka iyo in aysan dhibaato hor leh soo gaarin xilliyada hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan. Si taas loo suurta-geliyo, Dawladda Soomaaliyeed waxay go'aamisay:

1) Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa mas'uul ka ah hubinta in dhammaan qorsheynta iyo qiimeynta hawl-gallada ciidan ee lagu saleeyo baaritaannada khatarta ay waji karaan rayidka iyo dadka nugul. Goobaha loo asteeyo in ay ka jiraan khataro, taliyeyaasha hawl-gallada ayaa mas'uul ka ah dhaqan-gelinta sidii loo yareyn lahaa ama looga baaqsan lahaa khataraha ay wajihi karaan rayidka iyo dadka nugul, iyagoo siinaya digniino hordhac ah bulshada, maamulada degmooyinka iyo hay'adaha gargaarka.
2) Inta laga hawl-gelinayo Xafiiska cabashooyinka dadweynaha (ombudsman), CHMRU oo kaashanaysa Wasaaradda Amniga Gudaha ayaa sameynaysa hab-raac lagu soo gudbiyo cabashooyinka bulshada xilliyada hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan. Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa u gudbinaysa Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastruuka si loo hubiyo cabashada, loo sameeyo baaritaanno dheeraad loona waafajiyo hannaanka sharci ee lagu xallinayo cabashadaas.
3) CHMRU waxay mas'uul ka tahay in hab-raaca soo-gudbinta cabashooyinka dadweyne uu yahay mid asturan, caawinaya dhibbanaha, xaqiijinaya in aan dhibbanuhu wax aargoosi ah uusan la kulmin, isla markaana ay u fududahay isticmaalka dhammaan qeybaha kala duwan ee rayidka iyo dadka nugul.
4) CHMRU waxay mas'uul ka tahay diiwaan-gelinta, jawaab-celinta hellidda cabashooyinka, sameynta baaritaan hordhac ah, iyadoo si aan daahid lahayn u gudbinaysa cabashada hay'adda ku shaqada leh waqti cayiman si jawaab ku habboon loo siiyo dhibbanaha.

### 2.5.4 Isla-Xisaabtanka iyo Qaadidda Tallaabooyin Anshaxeed

Dhacdooyinka la xiriira xad-gudubka rayidka ee la xaqiijiyey waa in eedasaneyaasha gabood-falka ku lug yeesha lala xisaabtamo, laguna qaado tallaabada ku habboon ee sharci si waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa caalamiga ah:

a. Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka oo kaashanaysa Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa mas'uul ka ah qaadidda tallaabooyin maamul, anshax-marin iyo mid sharci ee eedaysaneyaasha geysta xad-gudyada rayidka iyo dadka nugul;
b. Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaysa Taliska Guud ama Talisyo qeybeedyada ay khusayso ayaa tallaabo ku habboon ka qaadaya haddii taliyaha hawl-galka uu ku guul-darreysto ka-hortagga, ka-warbixinta iyo ka-jawaabista dhibaatooyinka loo geysto rayidka;
c. Wasaaradda Cadaaladda oo kaanshanaysa Maxkamadda Ciidanka Qalabka Sida ayaa u gudbinaysa eedaymaha xad-gudubyada waaweyn hadba maxkamdda ku habboon ee awoodda u leh qaadidda dacwadaas; iyo
d. Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliska CXD ayaa mas'uul ka ah fulinta tallaabooyin sixid oo ay ka mid yihiin wax-ka-beddelka hawl-galka, bixinta tababaro si looga hortago in aysan soo noqon dhacdado xad-gudub mar labaad.

### 2.5.5 Tilmaamaha Waxqabadka iyo Hal-beegyada Kormeerka

1) Kormeerka hawlaha ilaalinta bed-qabka rayidku waa in ay ahaadaan kuwo ku saleysan caddeymo la xaqiijiyey, la cabbiri karo si ay u hagaan go'aan-qaadashada iyo isla-xisaabtanka.
2) Ilaalinta bed-qabka rayidku waa waajibaad sharci iyo mid hawl-gal oo saaran dhammaan hay'adaha amniga iyo taliyeyaasha hawl-gallada.
3) Dhammaan hawl-gallada amni waa in lagu sameeyaa kormeer ka hor, inta aan la fulin, iyo ka dib, si loo hubiyo u-hoggaansanaanta qodobbada ka-hortagga waxyeellada rayidka.
4) Unugga Yareynta, Diiwaan-gelinta iyo Ka-jawaabista Waxyeellada Rayidka (CHMRU) wuxuu mas'uul ka yahay ururinta iyo xaqiijinta xogta waxyeellada rayidka, falanqaynta isbeddellada iyo khataraha, iyo soo-bandhigga warbixinno joogto ah oo ku saabsan waxqabadka ilaalinta bed-qabka rayidka.
5) Waxqabadka ilaalinta bed-qabka rayidka waxaa lagu cabbirayaa hal-beegyo la qiyaasi karo, oo ay ka mid yihiin, hoos-u-dhaca waxyeellada rayidka, xawaaraha iyo tayada jawaab-celinta marka waxyeello dhacdo, u-hoggaansanaanta qiimeynta khatarta rayid ee hawl-gallada iyo aragtida, iyo kalsoonida bulshadu ka qabto ciidamada amniga.
6) Taliyeyaasha iyo hoggaannada hawl-gallada waxaa lagu qiimeynayaa waxqabadkooda ilaalinta rayidka, iyadoo natiijooyinku saameynayaan qiimeynta hawl-gal, tallaabooyinka maamulka, iyo horumarinta hoggaamineed.
7) Ku-guul-darreysiga joogtada ah ee u-hoggaansanaanta qodobbada ilaalinta rayidka waxay horseedi kartaa tallaabooyin maamul, anshax-marin ama sharci si waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa caalamiga ah ee ilaalinta rayidka.

Dhammaan cabashooyinka la xiriira waxyeellada rayidka waa in si degdeg ah, madax-bannaan oo asturan loo diiwaan-geliyo, loo baaro, loona siiyo jawaab ku habboon, iyadoo la ilaalinayo bed-qabka dhibbaneyaasha.

8) Bulshada rayidka, odayaasha dhaqanka, culimada diinta, haweenka iyo dhallinyarada waxay yihiin ilo-xogeedyo muhiim ah oo lagu taageerayo kormeerka, digniinta hore, iyo hubinta daah-furnaanta.
9) waa in si joogto ah loo diyaariyo warbixinno waxqabad oo ku saabsan ilaalinta bed-qabka rayidka, loona adeegsado hagaajinta hawl-gallada, ka barashada casharro iyo dib-u-habeynta siyaasadda.
10) Dib-u-eegis waqtiyeysan ayaa lagu sameynayaa hannaanka isla-xisaabtanka iyo cabbirrada waxqabadka si ay ula jaan-qaadaan xaaladda amni, casharrada la bartay, iyo waajibaadka qaran iyo kuwa caalamiga ah.

## 2.6 Tiirka Shanaad: Hay'adaynta iyo Joogtaynta Dhaqan-gelinta Siyaasadda

Tiirkan wuxuu diiradda saarayaa joogtaynta iyo xoojinta dhaqan-gelinta siyaasadda ilaalinta bed-qabka rayidka. Dhammaan hay'adaha bah-wadaagta ku ah fulinta siyaasaddan waxay mas'uul ka yihiin dhex-gelinta qaab-dhismeedka siyaasadda dhammaan hawlaha iyo waajibaadkooda joogtada ah.

### 2.6.1 Mas'uuliyadaha iyo Waajibaadka Hay'adaha

Mas'uuliyadaha ilaalinta bed-qabka rayidka waxaa loo kala yeelanayaa sidan soo socota:

a) Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa hormuud ka ah diyaarinta, iskudubaridka iyo fulinta siyaasaddan xilliyada hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan;

b) Wasaaradda Amniga Gudaha waxay u xilsaaran tahay kor-joogtaynta iyo kormeerka fulinta siyaasaddan ee hay'adaha ka shaqeeya amniga gudaha ee hoos yimaad wasaaradda;

c) Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta waxay u xilsaran tahay hoggaaminta hawlaha xasillinta, maamulka gudaha iyo hababka ilaalinta bulshada heer federaal iyo heer dawlad-goboleed;

d) Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka waxay u xilsaran tahay is-waafajinta xeerarka qaranka, wadiiqooyinka isla-xisaabtanka iyo u-hoggaansanaanta waajibaadka dastuuriga ah iyo kuwa caalamiga ah ee fulinta siyaasaddan;

e) Wasaaradda Arrimaha Qoyska iyo Xuquuqda Aadanaha waxay u xilsaaran tahay hoggaaminta arrimaha xuquuqda aadanaha, ilaalinta dadka la dhibban tacadiyada xad-gudyada takooridda, iyo ilaalinta kooxaha nugul;

f) Guddiga Qaran ee Ilaalinta Qaxootiga wuxuu u xilsaaran yahay iskudubaridka hawlaha ilaalinta bed-qabka barakaceyaasha gudaha; iyo

g) Hay'adda Maareynta Musiibooyinka waxay u xilsaaran tahay iskudabaridka gaarsiinta arrimaha gargaarka iyo maareynta Musiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa aan dabiiciga ahayn.

### 2.6.2 Xoojinta Awoodda Hay'adaha

Dawladda JFS waxay xoojinaysaa awoodaha hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasaddan si loo hirgeliyo waajibaadka ilaalinta bed-qabka rayidka xilliyada hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan. Si taas loo dhaqan-geliyo, dawladdu waxay xoogga saaraysaa:

1) Wasaaradda Gaashaandhigga, Wasaaradda Amniga Gudaha, ciidamada amniga iyo CHMRU waxaa waajibaadkooda hay'adeed, tilmaamahooda shaqo iyo qaab-dhismeedkooda Hay'adeed lagu darayaa hannaanka ilaalinta bed-qabka rayidka.
2) Hay'adaha kor ku xusan waxay u asteynayaan Hawshaan Sarkaal u qaablisan ilaalinta bed-qabka rayidka.
3) Hay'aduhu waxay hubinayaan in hageyaasha iyo hab-raacyada hawl-gallada ay ku saleysan yihiin qaab-dhismeedka ilaalinta bed-qabka rayidka.
4) In manhajka tababarada hay'adaha ciidanka iyo kuwa rayidka lagu daro hab-raacyada iyo qaab-dhismeedka ilaalinta bed-qabka rayidka.
5) Dhammaan hay'adaha kor ku xusan waxay mas'uul ka yihiin in ciidamada amniga lagu tababaro ka hor inta aysan hawl-gal ciidan gelin hannaanka iyo qaab-dhismeedka siyaasadda qaran ee ilaalinta bed-qabka rayidka.
6) CHMRU ayaa u noqonaysa hay'adaha amniga udub-dhexaadka laga hago, laga barto casharrada iyo agabyada farsamo ee ilaalinta bed-qabka rayidka xilliayda hawl-gallada amni ama colaadaha hubaysan.
7) Dhammaan Hay'adaha amni ee kor ku xusan waxay mas'uul ka yihiin sameynta qiimeynta hawl-gallada ka dib, falanqaynta xogaha la xaqiijiyey iyo diyaarinta casharrada laga baran karo si loogu jaan-gooyo wax-ka-beddellada hab-raacyada, hageyaasha, tababarada, maamulka qorsheynta iyo amarrada hoggaannada iyo dib-u-qaabaynta siyaasadda.

### 2.6.3 Isku-xirka Ilaalinta Bed-qabka Rayidka iyo Hawlaha Xasillinta

a. Ilaalinta bed-qabka rayidka waa shardi asaas u ah hirgelinta hawlaha xasillinta, waxaana fulinta waajibaadka ilaalinta rayidka loo aqoonsanayaa inay tahay shuruud fure u ah wareejinta mas'uuliyadda amniga, billowga hawlaha booliiska, cadaaladda, dib-u-heshiisiinta iyo gaarsiinta adeegyada dawladnimo;
b. Ka dib dhammaadka hawl-gal militari ama amni, waa in si qorsheysan oo waqti cayiman leh loogu wareejiyo mas'uuliyadda amniga iyo maamulka hay'adaha rayidka, gaar ahaan ciidanka booliiska, maamulka degmooyinka iyo hay'adaha

cadaaladda, iyadoo lagu saleynayo heerka u-hoggaansanaanta ilaalinta bed-qabka rayidka;

c. Hirgelinta hawlaha xasillinta, dib-u-soo-celinta adeegyada dawladnimo, iyo maal-gelinta barnaamijyada xasillinta waxaa lagu saleynayaa heerka la gaaray ee ilaalinta bed-qabka rayidka, oo ay ka mid yihiin yareynta waxyeellada rayidka, jawaab-celinta cabashooyinka, iyo ka-qeyb-galka bulshada;

d. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ayaa hoggaaminaysa hawlaha xasillinta ka dib hawl-gallada milatari, iyadoo kaashanaysa wasaaradaha kale ee ku shaqada leh, isla markaana ku saleynaysa tallaabooyinka xasillinta natiijooyinka ilaalinta bed-qabka rayidka;

e. Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Wasaaradda Amniga Gudaha waxay hubinayaan in wareejinta mas'uuliyadda amniga ay noqoto mid ammaan ah, la qorsheeyey, isla markaana ilaalinaysa bed-qabka rayidka; iyo

f. Aragtida iyo kalsoonida bulshada ee ku aaddan hay'adaha amniga iyo kuwa rayidka waxaa loo aqoonsanayaa cabbir muhiim ah oo lagu go'aamiyo diyaar-garowga xasillinta iyo wareejinta maamulka.

### 2.6.4 Miisaaniyadda Lagu Fulinayo Siyaasadda

Dawladda JFS waa in ay qaab-dhismeedka ilaalinta bed-qabka rayidka uga qoondeyso miisaaniyadda qaranka iyo kuwa deeqaha lagu helo iyadoo fulinaysa:

a. Dhex-gelinta hawlaha siyaasadda qorshe-hawleedyada iyo miisaaniyadaha sanadlaha ah;

b. Qoondeynta miisaaniyad u gaar ah tababarada, kormeerka iyo ka-jawaabista dhibaatooyinka soo gaara rayidka; iyo

c. Raadinta taageerada farsamo iyo dhaqaale ee dhaqan-gelinta siyaasadda.

### 2.6.5 Waafajinta Siyaasadda Xeerarka Qaranka iyo Kuwa Caalamiga ah

Wasaaradda Cadaaladda, Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqda Aadanaha waxay mas'uul ka yihiin:

a) In Sameynta, dib-u-eegista iyo fulinta siyaasaddan ay waafaqsan tahay dastuurka qaranka iyo siyaasadaha amniga dalka;

b) In siyaasaddu ay waafaqsan tahay waajibaadyada xeerarka caalamiga ah ee bani'aadannimo iyo kuwa xuquuqda aadanaha; iyo

c) In Siyaasaddu ay la jaan-qaadi karto qaab-dhismeedyada xasillinta, cadaaladda iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha.

### 2.6.6 Heerarka iyo Muddaynta Kulamada Iskuduwidda Siyaasadda

Siyaasadda ilaalinta bed-qabka rayidka waxay yeelanaysaa heerar iyo kulamo iskuduwid oo ay hoggaaminayso Wasaaradda Gaashaandhigga, sida kulamada iskuduwid ee heer siyaasadeed, farsamo iyo hawl-gal.

A. **Kulamada Iskuduwid ee heer Siyaasadeed:** Kulamadan waa heerka iskuduwid ee ugu sarreeya ee lagu kor-joogteeyo, lagu hago, loogana warbixiyo fulinta siyaasadda ilaalinta bed-qabka rayidka. Kulankaan waxaa ka soo qeyb-gelaya Xoghayeyaasha Joogtada/Agaasimayaasha Guud ee hay'adaha iyo Wasaaradaha ku shaqada leh fulinta Siyaasaddan iyo CHMRU iyo kooxaha farsamada ee hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasadda. Kulamadan waxaa shir-guddoominaya Wasaaradda Gaashaandhigga. Kulamadu waxay dhacayaan 3dii (saddexdii) biloodba mar.

B. **Kulmada Iskuduwid ee Farsamo:** Kulamadan waa heerka labaad ee iskuduwid ee lagu hirgeliyo fulinta siyaasadda, waxaana shir-guddoominaya CHMRU, waxaana ka soo qeyb-gelaya kooxaha farsamada ee hay'adaha ku shaqada leh fulinta siyaasadda. Kulamadu waxay dhacayaan 2dii (labadiii) biloodba mar.

C. **Kulamada Iskuduwid ee Hawl-gal:** Kulamadan waxaa lagu hagayaa qorsheynta hawl-gallada, fulintooda iyo sidii loo diyaarin lahaa warbixinnada hawl-gallada. Kulamadan waxaa shir-guddoominaya talisyada ciidamda amniga. Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Wasaaradda Amniga Gudaha waxay ku leeyihiin kormeer. Kulamada iskuduwidda hawl-gallada waxay dhacayaan 1 (halkii) bilba mar.

### 2.6.7 Dib-u-eegis Waqtiyeysan iyo Wax-ka-beddelka Siyaasadda

a) Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaysa Wasaaradda Amniga Gudaha, Wasaaradda Cadaaladda iyo Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqda Aadanaha ayaa dib-u-eegis ku sameyn kara siyaasaddan 3 (saddex) ama 5 (shan) sanoba mar si loo hubiyo waafaqsanaanta, wax-ku-oolnimada adeegga rayidka iyo ka-jawaabista ku saleysan ilaalinta bed-qabka rayidka.

b) Dhammaan hay'adahani waxay mas'uul ka yihiin fulinta joogteynta siyaasaddan, sameynta dib-u-eegis waqtiyeysan iyo waafaqsanaanta siyaasaddan, xeerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah.